# Dhalashadii Ciise



Waxa qoray Edward Hughes
Waxa Tusaaleeyay M. Maillot
Waxa tarjumay Zemendale Translation Service
Waxa dhaqan-geliyay E. Frischbutter; Sarah S.

Qisada 36 ee 60

**M1914.org**

**Bible for Children, PO Box 3, Winnipeg MB R3C 2G1 Canada**

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.






















Dhalashadii Ciise

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Matayos 1-2, Luukos 1-2

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

**Ilaah wuxuu ogsoonyahay** inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu ku magacaabo denbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho.

**Ilaah si aada ayuu inoo jecelyahay** waxaanu soo diray Wiilkiisa, Ciise, si uu ugu dhinto Iskutallaab korkeeda una bixiyo qaanta denbiyadeenna.

**Haddaad rabo inaad kasoo laabato xad-gudubyadaada**, sidan ku dhex Ilaah: Ilaahaygii weynaayow, waxaan rumaysanahay inuu Ciise u dhintay aniga aawaday isagoo haddana nool. Fadlan ii kaalay oo iga cafi denbiyadayda, si aan imika u helo nolol cusub, oo aan adiga weligaa kuula jiro. Igu caawi inaan adiga awgaa u noolaado anoo ka dhigan ilmahaaga. Aamiin. Yooxanaa 3:16

**Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba Ilaah la hadal!**

Somali


"Sidee baa waxanu ku noqon doonaan? Sidee baa waxanu ku noqon doonaan? Anigu ninna garan maayo." ayaa gabadhii ay weydiisay. Malaggiina wuxuu Maryan u sheegay in wiilku uu ka iman doono xagga Ilaah. Looma baahan doono markaas aabbe aadane ah.
3
Malaggii dabeetana wuxuu Maryan u sheegay in inaadeerteed Elisabed ay iyadoo weyn dhali doontay ilmo. Sidoo kale, tani waxay ahayd mucjiso. Wakhti gaaban dabadiis, Maryan waxa ay booqatay Elisabed. Ilaah ayaanay si wada jira u ammaaneen.
4
Maryan waxa ay u doonnaneyd nin la odhan jiray Yuusuf. Yuusuf haddaba aadbuu uga xumaaday markuu ugaaday in Maryan ay ilmo uurka ku siddo. Waxa uu u maleeyay in nin kale uu yahay ilmahan ay sido aabihiis.
5
Malaggii Ilaah ayaa Yuusuf riyo uugu sheegay in ilmahani uu yahay Wiilka Ilaah. Waxa markaas ay ahayd inuu Yuusuf Maryan ku caawiyo inay daryeesho Ciise.
6
Yuusuf wuxuu isku halleeyay oo addeecay Ilaah. Sidoo kale wuxuu addeecay sharciyada waddankiisa. Sharci cusub oo yimid aawadiis, Yuusuf iyo Maryan waxa ay ka tegeen magaaladii ay u dhasheen oo ahayd Beytaxam si ay u dhiibaan cashuurtooda.
7
Maryan waxay diyaar u ahayd inay umusho ilmeheeda. Laakiinse Yuusuf meelna kamuu helin qol ay ku dhasho. Meelaha loo hoydo oo dhammi waxa ay ahaayeen kuwo buuxa.
8
Ugu danbayntii Yuusuf waxa uu helay meel uu ku dego. Halkaasna waxa ku dhashay wiilkii Ciise. Hooyadii waxa ay dhigtay qabaal lagu rido cuntada la siiyo xoolaha.
9
Meel agtooda ah, waxa jiray adhijirayaal xoolohooda hurda ku ilaashanayay. Dabeetana iyada waxa u muuqday malaggii Ilaah oo ku wargeliyay warka cajiib leh.
10
"Maanta waxaa magaalada Daa'uud idiinku dhashay Badbaadiye oo ah Masiixa Rabbiga ah. Oo waxaa calaamo idiin ahaan tan, waxaad heli doontaan ilmo maro ku duudduuban oo ku jiifa qabaal."
11
Si kedis ah, waxa u muuqday malaa'ig badan oo iftiimaysa, waxayna ammaanayeen Ilaah iyagoo leh, ...
12
... "Ilaah ha ku ammaanmo meelaha ugu sarreeya, Xagga dhulkana nabad ha ahaato dadka ka farxiya Ilaah dhexdooda."
13
Adhijirayaashii waxay u dhaqsadeen xaggii ilmuhu jiray. Markii ay arkeen ilmahana cidkasta oo ay arkeen waxay u sheegeen waxyaalaha malaa'igtu ka tidhi Ciise.
14
Afartan maalmood dabadood, Yuusuf iyo Maryan waxay Ciise keeneen macbadka Yeruusaalem. Halkaas waxa joogay nin magaciisa la yidhaahdo Simecoon oo Ilaah ku ammaanay ilmaha, halka haweenay weyn oo Anna la yidhaahdo oo Rabbiga u adeegtaana ay ka mahad celisay.
15
Labaduba waxa ay ogaadeen in Ciise uu yahay Wiilka Ilaah, oo ah Badbaadiyaha lasii ballanqaaday. Yuusuf waxa uu qurbaan ahaan u bixiyay labo xammaam. Kani waxa uu ahaa allabariga uu jideeyay sharciga Ilaah oo ah in dadka saboolka ahi ay tahay inay wax keenaan marka ay ilmo dhashay soo hordhigayaan Rabbiga.
16
Wakhti dabadiis, xidig khaas ah ayaa niman xikmad leh kasoo hagtay Yeruusaalem xaggeeda bari. Waxa ay nimankii yidhaahdeen, "Xaggee buu joogaa boqorka Yuhuudda ee dhashay? waxaannu u nimid inaannu caabudno."
17
Boqor Herodos waxa uu maqlay nimankii xikmadda lahaa. Waa uu warwary oo iyagana wuxuu weydiistay inay ogaysiiyaan marka ay helaan Ciise. Waxa uu yidhi, "si aan anna ugu tago oo u caabudo." Laakiin been ayuu sheegayay oo waxa uu rabay inuu dilo Ciise.
18